



Dhagax dhigid loo qorsheeyay mashaariicda dhismaha ee Madison, Kellogg

Bilawga dhismaha casriyeynta Dugsiga Sare ee Madison iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee cusub waxaa kaliya inaga xiga dhowr toddobaad. Si loogu dabaaldego, munaasabadda dhagax dhiga ee soo socota ayaa ka dhici doonta labada goobood. Labadaasi dugsi waa mashaariicda dhismaha oo weyn ee ugu horreeya oo lagu maalgeliyay Maalgelintii Daymeed ee Maajo 2017-k.

Madison

Goorta: Sabtida, Maajo 18, 10 subaxnimo

Goobta: Albaabka hore, Dugsiga Sare ee Madison, 2735 NE 82nd Ave.

Waxyaabaha ugu muhiimsan: U.S. Rep. Earl Blumenauer iyo Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero ayaa noqon doona dadka ugu muhiimsan ee goobta ka hadli doona. Munaasabadda waxaa soo raaci doona dhacdo iyo ku soo wareega dhimsaha oo ay sameeyaan Urrurka Qalin jabiyeaasha.

Xaqiiqooyinka mashruuca: 2021-ka, Dugsiga Sare ee Madison, ee sida buuxda loo casriyeeyay ee qiyaastiisu dhan tahay 292,000 square foot ee ayaa dib u furmi doona isaga oo leh awood uu ku qaado 1,700 oo arday. Jawiga waxbarasho ee qarniga 21^{aad} wuxuu u adeegi doonaa inta badan ardayda kala duwan ee Portland ee ku hadla in ka badan 30 luqadood. Casriyeynta Madison waxaa ka mid noqon doona in ka badan 170,000 square feet oo ah dhismo cusub, oo ay ku jiraan masrax, goobaha dadka ka dhexeeya iyo goobta jimicsiga, taasi oo si aan kala go' lahayn ay iskugu dhafnaan doonaan dhismaha casriga ah-kuwa qarniga dhexdiisa la dhisay ee taariikhiga ah.

Macluumaad dheeraad ah: Fiiri [website-ka Casriyeynta Madison](#).

Kellogg

Goorta: Sabtida, Juun 1, 10-11:30 subaxnimo

Goobta: Dhismaha Kellogg, 6909 SE Powell Blvd.

Waxyaabaha ugu muhiimsan: Dad goobta ka hadlaya, madax degaanka ka socota iyo muusik ayaa lagu dari doonaa jawiga xafladda. Dhacdadu waxay sidoo kale dadka siin doontaa fursad ay kula kulmaan kooxda mashruuca isla markaana waxyaabo dheeraad ah uga ogaadaan dugsiga cusub.

Xaqiiqooyinka mashruuca: Goobta Kellogg waxay noqon doontaa dhismaha dugsigii u horreeyay ee sida buuxda looga dhiso Southeast Portland muddo sanado badan ah waxayna ardayda iyo shaqaalaha siin doontaa xarunta dugsiga oo casri ah. Waxaa ka mid noqon doona in ka badan 100,000 square feet oo ah dhismo cusub, oo ay ku jiraan masraxa bandhiga fanka, goobta jimicsiga iyo goobta lagu kulmo oo ujeedooyin kala duwan loo isticmaali karo, meel dadka ka dhaxaysa oo weyn, iyo meelo bannaanka ku yaala oo loogu talagalay waxbarashada. Dugsigu wuxuu xudun u noqon doonaa xaafadiisa, isaga bixinaya xarun waxbarasho oo cusub iyo xarun kheyraad oo loogu talagalay bulshada.

Macluumaad dheeraad ah: Fiiri [website-ka dib u dhiska Kellogg](#).